



# UNUGGA XIRIIRKA KOMUYUUNATIGA

QEYBTA BOOLISKA ee COLUMBUS • XAFIISKA JAWAABAHA  
ISTARAATEJIGA AH

## Macluumaad Ku Saabsan Amarrada Illaalinta

Qaar ka mid dhibbanayaasha dembiyada gacanta ah waxa laga yaabaa inay u qalmaan amar illaalin ah. Amarka Illaalinta ihi (protection order) waa amar ku meelgaar ah oo loogu talagalay inuu siiyo amaan iyo illaalin dhibbanayaasha dembiyada qaarkood.

### Waxa jira afar nooc oo Amarro Illaalineed ah oo uu booliisku dhaqangeliyo:

1. Amarka Illaalinta Ku Meel Gaarka ah ee Shaqaaqada Guriga (DVTPO)
2. Amarka Illaalinta Dembiyada (CrPO)
3. Amarka Illaalinta Madaniga ah (CPO)
4. Amarka Illaalinta Xadgudbaha Dabagalka Galmada ah (SSOPO)

### FIIRO GAARA:

- Amar ah 'Ka Fagow' **oo ah** shardi ku xiran furasho (bond) MA hirgalin karo booliisku, ee waxa hirgalin kara oo qura xaakinkii soo saaray amarkaas.
- Amarrada Ka-celinta ee laga soo saaro kiisaska furniinka MA hirgalin karo booliisku.
- Waa inay jirto eedeyn dembi xun ah (criminal charge) si loo dalbado amarrada DVTPO ama CRPO. Dacwad-oogaha ayaa wakiil kuu noqonaya inaad raadsato amarka DVTPO ama CRPO.
- Maaha inay jiraan eedeymo dembi xun ah in la dalbado amarrada CPO ama SSOPO. Looma baahna looyar, laakiin waxaan ku talineynaa inaad heshid wakiil sharci ah si aad u codsatid amarrada CPO ama SSOPO.
- Ma jiraan wax lacag fii ah oo laga qaado Amarrada Illaalinta.

Mar la soo saaro Amar Illaalineed, waxyeeluhu (abuser) wax xiriir ah kulama yeelan karo adiga, xitaa haddii aad adigu u oggolaato. Xaakin ama qaaddi oo qura ayaa beddeli kara shuruudaha Amarka. Amarka Illaalinta waxa loogu talagalay dadka u cabsanaya amaankooda. Waxyeelaha waa la xiri karaa haddii uu ku xad gudbo Amarka Illaalinta.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid Amarrada Illaalinta Dembiyada Xun ama kuwa Madaniga ah, waxaad wacdaa Unugga Shaqaaqada Guriga iyo Dabagalka ee Dacwad-oogaha Magaalada Columbus (614) 645-6232.

### Marka aad haysato Amar Illaalineed

- Waxaad hubisaa inaad waqti kasta sidatid koobbi ah Amarkaaga Illaalinta!

- Habo yaraatee wax xiriir ah ha la yeelanin eedeeyanaha inta uu kiisku ka dhammaanayo.
- Ha tagin meesha uu eedeeyanuhu degan yahay ama meelaha laga yaabo inuu joogo/inay joogto.
- Gurigaaga ha ku martiqaadin eedeeyanaha ama ha kula kulmin meel kale.
- Koobbi ama nuqul ah Amarkaaga Illaalinta u gee saldhiga booliska xaafaddaada si ay u oggaadaan dhibaatooyinka iman kara. Beddel qufullada albaabkaaga oo ha xirnaadaan albaabadaada iyo daaqadahaagu.
- Ulo xoog weyn geli daaqadaha iyo albaabada muraayadda ah ee jiidma.
- U dig deriskaaga, dadka kula shaqeeya, dugsiyada iyo xarumaha xannaanada ilmaha haddii eedeeyanaha lagu arko gurigaaga, shaqada, ama dugsiiga.
- Qof ha kula joogo, haddii la awoodi karo.
- Keligaa dibadda ha u bixin.
- Xasuusnow in marqaatiyaashu muhiim yihiin. Dad ag joog markii aad kartidba.